

Shhekaddii seddexda orgi

Baribaa waxa jiray seddex orgi waxana loogu yeer jiray bukken Bruse. Maalin maalmaha kam ide ayey

daaq tageen si ay isku naaxiyaan. Si ay meesha daaqa badan leh u tagaan waa in ay ka gudbaan buundo ama briij. Brijka ama buundada hoosteeda waxa ku yaal biyo dhac uu dagan yahay cirfiid weyn foolxun oo gaajaysan, indihiisu waawaynida waxa ay leekaayeen saxammo , sankiisuna dhererka waxa uu leekaa ull dheer. Markii uhoraysay origada kii ugu yaraa ayaa ayaa isku dayey inuu ka gudbo buundada ``Qudhubqadhab, qudhubqadhb, qudhubqadhab`` ayaa ka yeertay brijka dushiisa.


``Waa ayo ka buundadayda ka kor qudhubqudhubta hayaa ?`` ayuu ku qayliyey cirfiidkii.

`` Ah Waa orgigii orgida ugu yaraa. Waan daaq tagaya si aan isku naaxiyo``

`` Haddann kuu imanayaa oo ku cunayaa,`` ayuu yiri cirfiidkii

`` Ah maya aniga ha cunin , waayo anigu waan yarahay, waxyar hadaad sugto, waxa imanaya orgida kii dhexe oo aniga aad iiga weyn,`` ayuu dhahay orgigi.

``waayahaye iska soco,`` ayuu yiri cirfiidkii.



Illustrasjon: Pixabay og NAFO

Waxyar ka bacdi waxa yimid orgigii dhexe oo raba inuu buundada ka gudbo.

``Qudhubqadhab, qudhubqadhb, qudhubqadhab,`` ayaa buundaddii ka yeertay.

``Waa ayo ka buundadayda ka kor qudhubqudhubta hayaa ?`` ayuu ku qayliyey cirfiidkii.


``Waa orgigii dhexe,, waan daaq tagayaa si aan isku naaxiyo`` ayuu yiri orgigii.

`` Haddann kuu imanaya oo ku cunayaa,`` ayuu yiri cirfiidkii

Tekst til eventyret om *De tre bukkene bruse* på somali

``Ah aniga ha i cunin, wax yar sug , waxa imanaya orgigii ugu waynaa orgida oo aniga aad iiga weyn.``

``waayahaye iska soco,`` ayuu yiri cirfiidkii.



Illustrasjon: Pixabay og NAFO


Wax yar kabacdi waxa, waxa yimid orgigii orgida ugu weynaa. ``Qudhubqadhab, qudhubqadhb, qudhubqadhab,``ayaa buundaddii ka yeertay. Aad ayuu ucuslaa oo bundadii ayaa dildilaacdya.

Tekst til eventyret om *De tre bukkene bruse* på somali

``Waa ayo ka buundadayda ka kor qudhubbudhubta hayaa ?`` ayuu ku qayliyey cirfiidkii.

```Waa orgida kii ugu weynaa` , ayuu yiri orgigii.

`` Haddann kuu imanaya oo ku cunayaa,`` ayuu yiri cirfiidkii




*Illustasjon: Pixabay og NAFO*

!!Wirr kaalay! Kaama cabsanayo. Waayo wxan leeyahay laba gees oo sida waranka u waawayn, indhaha ayaan kaaga soo saari doonaa! Wuxa kaloon haystaa raafaf dhaxda oo kale ah oo aan ku dagaalamo oo dhuuxa iyo lafaha kaaga jajabiyo`` ayuu yiri Orgigii weynaa.

Waayahaye kaalay dagaalanee ayuu yiri orgigii

Tekst til eventyret om *De tre bukkene bruse* på somali



*Illustrasjon: Pixabay og NAFO*

Markaasuu orgigii intuu ku booday cirfiidkii oo geesihii dhaadheeraa indhaha kaga soo saaray, oo dhuuxa iyo lafahaba jabiyeey markaasuu cirfiidkii ku dhacay biyo dhacii. Orgigii orgidii kale ayuu utagay oo ladaaqay si uu u naaxo. Halkaa ayey orgidii kunnaxeen oo ay xataa gurigii inay tagaan kariwaayeen.

Haddii aanay baruurtu dilin weli meeshii ayey joogaan.

Sheekadiina hakaas ayey inoogu dhamaatay.